



Somali Federal Republic
Ministry of Health and Human Services

SHAQO BANNAAN: AGAASIME GUUD

Goobta Shaqada: Muqdisho

Taariikhda bilowga shaqada: 1st Septembet 2015

Shuruud: Ansixanta Golaha Wasiiradda

Soo dir: Codsii iyo taariikh Nololeedkaaga (CV)

Agaasimaha Guud waxaa la xisaabtami kara Wasiirka iyo Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada wixii la xiriira waajibaadka shaqo waxaa lagu qeexayaa waajibaadka shaqada (TOR-ka). Agaasimuhu wuxuu mas'uul ka yahay/tahay dejinta qorshaha guud ee Wasaaradda iyo fulinta barnaamijka Dowladda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan shuruucda dalka.

Doorka iyo Mas'uuliyadda Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka noqon doonaa adeegyada caafimaad ee Wasaaraddu u heyso Ummadda Soomaaliyeed.

Waajibaadka Agaasimaha Guud

- Qorshaha horumarineed ee Wasaaradda
- Dejintaiyo dib u habeynta ujeedooyinka siyaasadda caafimaadka ee Dowladda Federaalka
- Xoojinta awoodaha iyo tayeynta adeegyada caafimaad ee dalka
- Yagleelida iyo karti dhisida Wasaaradda Caafimaadka iyo shaqaalaha
- Hogaaminta mashaariicda waaweyn ee ay Wasaaraddu qorshaynayso mustaqbalka
- Horumarinta qorshe istaraatiijiyadeed ee dib u dhiska Isbitaalada Guud ee heer degmo ilaa heer gobol
- Maamulista iyo kormeerka Isbitaalada guud iyo kuwa gaarka loo leeyahay
- Soo saarista qiyaas miisaaniyadeedka sanad walba
- Qeexida doorka waaxyaha kala duwan ee Wasaaradda
- La-xisaabtanka shaqaalaha Wasaaradda oo ay ku jiraan agaasimayaasha waaxyaha iyo wakiilada mashaariicda
- Horumarinta nidaamka iskaashiga xiriirka shaqaalaha hexdooda
- Maamulka shaqaalaha waaxyaha iyo hirgelinta isla xisaabtan hufan
- Abuurista jawi sahlaaya wada shaqayn wacan dhex marta shaqaalaha iyo madaxda Wasaaradda
- Horumarinta nidaamka la xiriirka deeq bixiyeyaasha kala duwan
- Metelaadda Wasaaradda Caafimaadka gudaha iyo dibadda markii loo baahdo
- La-shaqeynta iyo iskaashiga Wasaaradaha kale ee dowladda Federaalka

Shuruudaha Waxbarashadda

- a) Inuu heystaa shahaado Jaamacadeed heerka labaad ee dhinaca Caafimaadka Guud iyo takhasus oo ay bixisay Jaamacad la aqoonsan yahay
- b) Haddii uu heysto shahaado Jaamacadeed oo dhinaca maamulka ah, waxay xoojineyaa musharaxnimadiisa
- c) Inuu si fiican u yaqaan isticmaalka Aalada computer-ka iyo barnaamijyada muhiimka ah.
- d) Inuu karti u leeyahay xiriirinta dhinacyo kala duwan oo wada shaqeeya
- e) Inuu leeyahay tilmaan hogaamineed, kuna shaqeyn karo xaalado adag

Waaya-aragnimada

- Waa inuu leeyahay khibrad ugu yaraan 6-sano ah oo ku saabsan shaqooyin ku saabsan maamulka Caafimaadka
- Waa inuu hore u soo qabtay shaqo wasaaradeed, awoodna u leeyahay inuu dejiyo qorshe howleedka Wasaaradda ama Hay'adaha waaweyn
- Waa inuu waaya-aragnimo u leeyahay maareynta iyo cusbooneysiinta qandaraasyada, heshiisyada iyo kormeerista hay'adaha caalamigaah
- Waa inuu waaya-aragnimo u leeyahay xalinta khilaafaadka shaqaalaha dhexdooda.
- Waa inuu waaya-aragnimo u leeyahay la-shaqeynta hay'adaha caalamiga ah iyo xiriirintooda

Luqadaha

- Waa inuu si fiican ugu hali karaa, qori karaa xiriirna ku sameyn karaa luqadaha Ingiriiska iyo Carabiga
- Haddii uu luqad kale aqoon u leeyahay waxay xoojineyaa musharaxnimadiisa

Haddii aad daneyneyso shaqadan fadlan CV-gaada iyo codsi ku soo dir emailka Wasaaradda ee hoos ku qoran ugu danbeyn 31-ka July 2015.

Waxaa lala soo xiriiri doonaa xubnaha la xusho oo kaliya.

Email: Minister@moh.gov.so